

## ESOL

Haddii Ingiriisigu uusan ahayn luqadaada koowaad, waxaan kuu haynaa koorasyo badan oo aad Ingiriisigaaga kor ugu qaadi kartid. Ingiriisiga loogu Taloglay Dadka Luqadaha kale ku Hadla (ESOL) wuxuu kaa caawinayaa sidii aad kor ugu qaadi lahayd luqadda Ingiriisiga ee aad UK uga shaqaysan lahayd, wax uga baran lahayd oo aad si caadi ah ugu noolaan lahayd.

Koorasyadadayadu waxay dadka baranaya u oggolaanayaan inay:

- ***Bartaan Ingiriisi ay ku shaqeystaan oo hagaajiyaan fursadahooda shaqo helista***
- ***Helaan shahaadooyin Ingiriisi oo ay aqoonsan yihiin shaqo bixiyayaasha iyo machadyada waxbarasho ee dalka gudahiisa iyo dibadiisaba***
- ***Kor u qaadaan xirfadooda iyo koorasyadooda waxbarasho si ay ugu gudbaan heer jaamacadeed***
- ***La qabsadaan nolol maalmeedka UK oo si fiican waddanka ugu noolaadaan***
- ***Bartaan xirfadaha kale ee ay ka midka yihiin xisaabaha iyo cilmiga kombiyuutarka***

Macallimiintayadu waa macallimiin furfuran oo kaa caawinaya wax kasta oo aad rabtid inaad baratid sida: hadlaka iyo dhegeysiga, akhriska iyo qorsita, eraybixinta, hakadyada iyo joogsiyada iyo naxwaha. Waxaa jira heerar kala duwan oo barashada Ingiriisiga ah, annaga ayaana imtixaan kaa qaadi doona si aan kuu geyno heerka kugu haboon.